# Warbixin yar autism

ee carruurta iyo dhallinyarada

Xarunta baaritaanka ee gobolka

REGION
VÄSTRA GÖTALAND

# Tusmada

Xogtan waxa loogu talogalay qofkii masuul ka ah ilmo ama kuray ay Xarunta Baarista Gobolku ka baartay kana heshay.ADHD ama autism

Buugyaruhu wuxuu si kooban u sharraxayaa:

- Waa maxay autism
- Baaritaanka autism
- Sababaha keena autism

# Waa maxay autism

Carruurtu waa kala kaan. Taasi waxay khusaysaa carruur autism qabta iyo kuwa aan qabin labadaba. Koriimadooda iyo qaan-gaaridooda ayaa sidoo kale qaadata wakhti kala duwan. In qof karo jihaynta iyo maamulka hab-dhaqankiisa waa muhiim si uu u madax-bannaanaado oo uu u awoodo inuu la shaqeeyo dadka kale.

Xittaa iyadoo uu jirto fahamka ah in carruurtu kala duwan tahay, ayaa haddana waalidku ka welweli karaa haddii habdhaqanka cunugiisu ka duwanaado kuwa la ayniga ah. Waxa kaloo qofku la yaabaa sababta habdhaqanku u adag yahay in si caadiga ah loo bedelo, tusaale ahaan iyadoo la isticmaalayo amar iyo canaan.

Ilmuhu waxuu u baahan yahay in uu is maamulo tusaale ahaan kolka uu ku qasban yahay inuu xoog saaro hawl aanu dooran, ama raaco tilmaamo iyo xeerar ama aanu dadka kale hadalka ka dhexgelayn.

Markay da'du sii korodho, rajada ah in ilmuhu ku fillaan karo arrimahan ayaa korodha, waana qayb ka mid ah doorka waalidka si uu u qalabeeyo ubadka si ay ilmuhu u helaan madaxbannaani weyn. Maadaama carruur oo dhammi kala duwan yihiin, waxyaabo kala

duwan ayaa sidoo kale looga baahan yahay waalidiinta kala duwan si ay tan u fusho.

Autism-ku wuxuu noqon karaa in ilmaha ay ku adag tahay inuu is maamulo. Autisamku waa xaalad macneheedu yahay in qofka ay haystaan dhibaatooyin waaweyn oo xagga abuurista, ka-qaybgalka iyo inuu fahamo/ ay fahamo xaaladaha bulsho. Intaa waxaa dheer, autismku wuxuu muujinayaa baahida loo qabo qaababka iyo hababka caadi ah iyo awood xaddidan ee lagu maareeyo dareen cusub, iyo dadka qaba autismka sidaas darteed waxay badanaa doorbidaan in loo sii sheego oo qaaba cad ay raacaan.

VAutism-ka, waa isbeddello ka jira maskaxda oo sababa calaamado dhowr meelood ka muuqda oo muhiim ah kuwaas oo la xiriira awooda garasho, tusaale ahaan sida maskaxdu wax u qaadato, u shaqeyso, u kaydiso oo ay u soo saarto xog. Waa awoodda garasho ta aynu wax ku qorshayno oo aan ku habayno hawleheenna mustaqbal dhow iyo mid fog, ku qiimayno natiijooyin, ku xallinno dhib oo ku gaarno go'aanno qaabaysan.

Sidaan hore u soo sheegnay, dhammaan carruurtu waxay leeyihiin shakhsiyado gaar ah oo saamayn ku leh sida iintooda isu muujiso iyo cawaaqibka ay keento. Intee in le'eg ayay baadhistu ku yeelanaysaa nolol maalmeedka ilmaha sidoo kale waxa ay ku xiran

tahay deegaanka ilmuhu ku nool yahay, taasoo micnaheedu yahay in dhibatooyinku ay u kala duwanaan karaan oo ay keeni kara caqabado kala duwan inta ay korayaan.

Xaaladaha qaarkood, autismku wuxuu noqon karaa faaiido, gaar ahaan marka ilmaha loo oggolaado inuu doorto hawlihiisa, laakiin badanaa tani waxay keentaa in ilmaha ay ku adkaato inuu la qabsado waxyaabo badan oo ka mid ah shuruudaha nolol maalmeedka, koley iskuulkana ku tahay.

Autism-ku maaha cudur shaqona kuma laha caqliga. Balse qofka ayaa u shaqaynaya si kale oo ka duwan sidii ay dadku ka filanayeen. Autism-ku kuma lug yeesho oo kaliya dhibaatooyin laakiin sidoo kale waxaa lagu sifayn karaa karti, tusaale ahaan waa wax caadi ah in dadka autismka qaba ay yihiin dad daacad ah, dad macquul ah oo ku fiican inay si kale u wax u arkaan.

Badi dadka qaba autism-ka waxay bartaan inay kabaan dhibkooda iyagoo si miyir leh u hindisa una isticmaala xaaladaha bulshada xeelado ay barteen. Kuwa aan qabin autism-ka tani had iyo jeer waa u caadi iyagoo adeegsanaya fahankooda bulsho.

in si miyir leh looga fekero in xaalad kasta ay u baahan tahay tamar maskaxeed badan ayna abuuri karto walaac, taas oo keenta in dadka autismka qaba

badanaa nasashada uga baahi badan yihiin dadka kale ka dib markay la soo joogeen dadka kale ama ay soo sameeyeen waxyaabo iyaga ku cusub.

Dad badan oo qaangaar ah oo leh hibo wanaagsan iyo luqad si fiican u horumarsan waxay bartaan inay qariyaan dabeecadahooda xaddida iyo wax ku celcelinta laakiin xiisaha gaarka ah ayaa sidoo kale u noqon kara farxad iyo guul. Waxay qaarkood ka heli karaan waxbarashada fursad wax ku ool ah iyo nolosha shaqo ee dambe. Waa iska caadi in wixii ku adkaa markii ay carruurta ahaayeen aaney ku adkaan doonin marka ay weynaadaan.

# Baaridda autismka

Autismku waa astaan muuqata. Taa micneheedu waa in jawaabta baaritaankaagu ay noqonayso waxa astaamo adi kaa muuqda ee ma aha wax ”khaldan” oo gudaha jirka ku jira.

Waxaa jira heerar baaritaan oo adag si loo ogaado ilmaha qaba autism. Sababtu waxa weeye carruurtu siyaabo kala duwan ayay u shaqayn karaan iyada oo aanay taasi macnaheedu ahayn in ilmuhu leeyahay astaamaha.

Si ilmaha looga helo autism waxa shardi ah in ay jiraan dhibaatooyin waaweyn marka loo eego da'diisa. Ilmuhu waa in uu dhib kala kulmaa labada qaybood ee waaweyn oo aan hore u soo sheegnay: dhexgalka bulsho iyo habdhaqan xaddidan oo wax ku celcelin leh. Sida dhanta ah oo ay calaamadahani u ekaan karaan waxaa lagu sharaxay bogga xiga.

Dhibaatooyinku waa in ay wakhti dheer soo jireen oo ay ku sababaan dhibaatooyin aad u weyn nolol maalmeedka taas oo keeneysa hoos u dhac xag shaqo ah. Dhibaatooyinka waa in sidoo kale laga dareemo dhowr meelood, tusaale ahaan guriga iyo xanaanada ama dugsiga labadaba.

# Dhexgal bulsho

Dhibaatooyinka dhexgalka bulsho iyo xiriirka bulsho ee autismka waxa lagu xusi karaa saddexda qaybood ee soo socda.

## Xiriir labo dhinacle ah ee bulsho

Xiriir bulsheed laga dhinacle ah macnahiisu waa kartida la falgalka dad kale iyo la wadaagidda fikrad iyo dareen. Carruurta yaryar ee qabta autismka waxa lagu arkaa in ilmuhu wax yar ama waxba isdhexgal ah aanu bilaabi karin oo aanu la wadaagin karin dareen dad kale oo aanu ku dayan karin dabeecadaha dadka kale.

Carruurta hadasha waxay inta badan u adeegsadaan luqadda si keli ahaan ah iyo waxoogaa labada dhanba ah. Tusaale ahaan, waxay magacaabi karaan oo weydiiyaan qofka waxyaabo halkii ay la sheekaysan lahaayeen oo ay la wadaagi lahaayeen dareenka iyo khibradaha dadka kale. Dadka waaweyn iyo kurayda leh hadal horumarsan waxaa laga yaabaa inay ku adkaato inay ogaadaan sida iyo goorta la bilaabayo wada hadal. Way adkaan kartaa in la ogaado waxa jira iyo waxa aan ku habboonayn in la sheego wakhtiyo kala duwan.

## Wadahadal oraah-laawe ah

Wadahadal oraah laawe ah waa mid lagu gudbiyo ereyo la'aan. Waxuu noqon karaa baaqyo ama wejitubyo. Carruurta yaryar ee aan aqoon wadahadalka oraah-laawaha ah waxa lagu garan karaa in aaney farta fiiqin, wax ku tusin ama aaney soo qaadin alaab loo tilmaamay si ay dan u sheegtaan. Carruurta aadka u yaryar waxa arrintan badanaa lagu gartaa in ay dadka kale u adeegsadaan sidii aalad ay ku gaaraan dantooda, tusaale ahaan qof ayey gacanta qabtaan oo u saraan gasac ay rabaan in loo furo ama qof ayey jiitaan si wax khaanad ku jira loogu soo dejiyo..

## Abuurid, sii wadid iyo fahmidda dadka kale

Danta bulsheed waxay noqon kartaa mid xadidan laakiin sidoo kale leexsan amaba maqan. Carruurta yaryar ayey arrintani si cad uga muuqan kartaa. Waxa tusaale ahaan, lagu garantaa in ilmuhu aanu ka qayb qaadan ciyaaraha is yeelyeelka ama inuu wax yar ka qaybgalo. Carruuro badan oo ku jira da'da dugsiga barbaarinta keligood uun baa ciyaara ama ciyaar iyaga u gaar ah ciyaara, balse ag jooga carruurta kale. Carruurta xoogaa waaweyn in ay la ciyaar kuwa kale waa dhici kartaa. Badana carruurta kale waxay u baahan yihiin inay raacaan sharciyo gaar ah oo ku saabsan sida loo ciyaarayo.

Dhallinyaro iyo qaangaar waxay badanaa ku dhibban yihiin inay fahmaan sida loola dhaqmo dadka kale xaalado kala duwan. Waxaa laga yaabaa inay door bidaan inay iskood wax u samaystaan ama ay raacaan kuwa aad uga da' yar ama uga weyn. Dad badan baa raba inay saaxiib yeeshaan iyagoon dhab u ogayn micnaha saaxiibtinimada ama sida saaxiibbo loo yeesho. Dabcan, waxaa sidoo kale jira dhalinyaro badan oo qabta autismka kuwaas oo leh asxaab iyo saaxiibbo, laakiin xitaa kuwa leh xiriirradda hoose, wadasocodkaas ayaa inta badan ka qaata tamar maskaxeed oo badan waana wax daal leh..

## Dhaqan xadidan oo soo noqnoqda

Si loo ogaado qabidda autism waa in la eego inay jiraan camallo xaddidan ama kuwa lagu celceliyo (ama lagu arko) ugu yaraan laba ka mid ah meelaha soo socd:

### Dhaqammo lagu celceliyo ama soo noqnoqda oo kala nooc ah

Waxay noqon kartaa tusaale ahaan gacmo wilfin ama faro qalqaloocin ama ku celcelin shey isticmaalkii (wareejin, safid) ama hadal si goonni ah loogu celceliyo (ku celcelin eray, oraah, cod, magac u yaallo la isku khaldo, dhaadhaajin, oo ah in goortaba lagu celiyo wax qof hadda dhow yiri).

Dad badan oo qaba autism-ka ayaa door bidi kara inay xarakaad ku muujiyaan shucuur xooggan halkii ay cod iyo erayo ku muujin lahaayeen - tusaale ahaan, inay gacmaha wilfiyaan intii ay qosli lahaayeen ama raynrayn lahaayeen.

## Ku qafilnaan nidaam iyo ka hor imaan isbeddel

Qaar baa aad uga carooda xitaa isbeddellada yaryar ee joogtada ah iyo jadwal maalmeedka ama sida, tusaale ahaan, waxyaabaha qaarkood loo sameeynayo. Taasi waxay noqon kartaa in qofku si adag ugu xirmo nidaam iyo xeerar si taxadar leh loo raacayo. Waxa kaloo ay noqon kartaa in loo hadlo oo loo fikirto hab cibaadaysan oon wax badan laga beddeli karin, tusaale ahaan ku celcelinta su'aalo isku mid ah weydiintood adoo jawaabta og ama inaad raatib ka dhigato sheeko dheer oo lagu seexdo oo joogto ah oo leh faahfaahin badan oo habeen kasta laga sheekeeyo.

## Ku dhegganaan dano kooban oo culays iyo hadaf aan caadi ahayn leh

Ugu horrayn waa culayska aan caadiga ahayn, laakiin danta ayaa sidoo kale noqon karta mid aan caadi ahayn. Ilmaha waxay kaga dhegi kartaa tusaale ahaan fadhiga musqusha ama boor-dafaha ku dhejin karaa ama alaabta carruurtu ku ciyaarto ee gaarka ah. Kurayga ama qaangaarka, iyaguna, waxa laga yaabaa inay dan culus ka leeyihiin mawduuc khaas ah. Mararka qaar danahaasi caadi kuma aha da'da laakiin marmar ayey noqon karaan dano guud oo qaata juhdi aan caadi ahayn - tusaale ahaan, ilmo danaynaya xeegada oo sanado badan aan kor ka

baran karin heerka kooxdu kaga jirto jadwalka iyo xogta ciyaartoyda.

## Falcelin aan caadi ahayn ama xiise ku laran ur, dareen iyo arag ama maqal

Waxa laga yaabaa inay ku lug leedahay ur xad dhaaf ah ama taabasho shay ama oogo oo uu ka helo waxyaalo warwareegaya ama dhaldhalaalaya iwm.

Qaar dhibsada iyo qaar ka caaggan dareennada kala duwan ayaa jiri kara. Tusaale ahaan, waxaa laga yaabaa in si cac leh oo xooggan looga falceliyo jabaq caadi ah ama aad dhibsada qabow, kulayl ama aunaba dareemayn ama uu dhibsanayo qabow, kul ama xanuun.

Waa caadi in isla qof qura uu dhibsan karo misana aanu dareemayn – tusaale ahaan in aanu ogayn in uu wax isku dhiftay balse uu xanuunsanayo gobo´da tuubbada qubayska ama ay dhibaan codad aan la maqli karin misana uu rabo in TV-ga codkiisa kor aad loogu dallaco.

Noocyadan falcelin oo aadka u xooggan iyo habnololeedka ayaa sidoo kale inta badan lala xiriiriyaa caadooyin cunno oo xaddidan iyo kuwa duwan. – Haddaad aad ugu fiican tahay dareemidda urta, dhadhanka iyo cufnaanta, way adkaan kartaa inaad hesho wax la cuni karo oo caraf iyo dhadhanba leh oo dareensiiya macaan afkaaga.

## Dhibo kale oo caadi ah oo wada socda

Waa caadi in ilmaha isku mar dhibaatooyin kale haystaan. Tusaalooyinka qaar ka mid ah dhibaatooyinka caadiga ah waa qoraal iyo akhrin darro, dhib waxbarasho, qannaacnimo, hurdo xumo iyo ADHD.

In aanu ahayn sida kuwa la da´da ah ayaa saamayn xun ku yeelan karta kalsoonida. Qaar ka mid ah carruurta iyo dhalinyarada qaba autismka ayaa dareema in ay ka duwan yihiin asaaggood taasoo keenta walaac iyo niyadjab.

Waa muhiim in ilmaha loola dhaqmo si xushmad leh oo la fahmo dhibka haysta. Dhibka ubadka haysta ma aha in uu dadaal la'aan ama tarbiyadda ka yimi. Ma aha hawlgabnimadu waxa go'aaminaya in qofku "naafo" yahay iyo in kale. Waa cilladaha bay´ada ka jira kuwa curyaannimada abuura. Haddaba waa in ahmiyad weyn la siiyo in derisku si fiican u fahmo ubadka oo uu raadiyo xog si looga gudbo cilladahaas oo loogu taageero ubadka nolol maalmeedka.

In aan si sax ah loo qaabilin, in aan loo fududayn ama la siin wakhti nasasho oo ku filan waxay badanaa horseedi kartaa cudur nafsi sida walaac ama niyadjab.

Ma jirto sabab keli ah oo autismka keenta. Waa macquul inay jiraan sababo dhowr ah, halkaasoo hiddosidayaasha iyo degaanka ay u badan tahay inay door ka ciyaaraan.

# Sababaha keena autism

## See autism u badan yahay?

Dabeecadaha iyo shaqada aan la xiriirinno cudurka autism waxay u badan tahay inay goor walba jirtey, laakiin sannadihii ugu dambeeyay dad ka badan kuwii hore ayaa laga helay. Kor u kacu mindhaa wuxuu ugu horrayn ku xiran yahay in aqoonta ku saabsan autismka ka korortay xag waalid, dugsi iyo daryeel.

Maaddaama ciladdu ay ka jirto degaanka keliya, horumarka bulshada ayaa sidoo kale door weyn ka ciyaara xaqiiqda ah in maanta dad badan laga helay autism. Waxaa jira shardiyo kale oo ku saabsan madaxbannaani iyo la qabsi maanta marka loo eego 25-30 sano ka hor, dugsiga iyo shaqada labadaba.

In ka badan 1 boqolkiiba carruurta da'da dugsiga ayaa lagu qiyaasaa inay qabaan cudurka autism. Kuwo badan ayaa weli leh calaamadaha sida qaangaarka laakiin waxay bartaan sida loo maareeyo dhibaatooyinka ama waxay helaan fursad ay ku doortaan degaan ay dhibaha uga dhiga fursado.

Gabdhaha iyo wiilasha qaba autism waxay leeyihiin dhibaatooyin asaasi iyo kuwo hawlgabnimo oo isku mid ah.

Inta badan wiilasha waxaa la ogaadaa autism-ka caruur markay yohiin laakiin markay sii weynaadaan farqiga u dhexeeya lab iyo dheddig ayaa isbedela iyadoo haween badan oo dhallinyaro iyo qaangaarba leh lagu ogaado. In hablaha lagu arko autism wiilasha ka dib waxaa laga yaabaa inay ku xiran tahay in aqoonta sida autismku uga muuqdo hablaha heer kooxeed ay aad u hoosayso xagga shaqaalaha dugsiga iyo kuwa daryeelka caafimaadka. Ama dhibka jira lama dareemo ama si khaldan ayaa loo fasiray.

Mararka qaarkood gabdhuhu waxay sidoo kale ku fiican yihiin inay qariyaan dhibaatooyinkooda.

Marar badan waalidku ayaa si cad u arka dhibaatooyinka hablaha.

# Gabagabo sidan yeel bilowga

Cunugaagu hadda waxa lagu sameeyay baadhitaan neerfaha waxana laga helay xaaladdan. Ujeedada baaritaan waa in la fahmo kartıda gaarka ah ee ilmahaagu leeyahay iyo waxii ku adag nolol maalmeedkiisa si aad sida ugu fiican u fahamto, ugu fududayso ugana qaabisho ilmahaaga.

Jawaabta baaritaanka waxay kugu noqon kartaa mid naxdin iyo jahwareer leh iyo wax intaa u dhexeeya. Carruurta iyo dhallinyaradu badankoodu marka ay sii weynaadaan waxey bartaan wixii laga caawiyo waxayna helaan xeelado wanaagsan waxayse adiga iyo iskuulka uga baahan yihiin caawin si ay u gaaraan meeshaas.

Tabo iyo talooyin ku saabsan sidii aad hawsha u sii wadi lahayd, waxaad ka heli buugyaraha "daryeel, taageero iyo daawayn"